


Amarka Cusub ee Joogitaanka-Guriga Ontaariyo laga BILAABAN 8-da Abriil, 2021

Kulanno iyo Xiriir Dhow

- Lama ogolo in la isugu yimaado guriga gudhiisa qof aadan la noolayn
- Ha booqanin reer kale ama ha u oggolaan marti gurigaaga
- Haddii aad keligaa nooshahay, waxaad xiriir dhow la yeelan kartaa hal qoys oo kale oo keliya
- Ugu badnaan waxa la oggol yahy 5 qof inay isugu yimaadaan banaanka
- 15% inta uu qaado meelaha gudaha lakin bannaanka ma xaddidno sida arrimaha diinta, arooska iyo aaska kaliya.



Xanaano iyo Iskuulada caruurta

- Iskuulada way furan yihiin marka laga reebo Toronto iyo Peel, halkaas oo ay xidhan yihiin ilaa fasaxa xiliga guga ka dib.
- Adeegyada daryeelka ama xaananoyinka carruurta way furan yihiin.

Kireysiga Guryaha iyo ka Saaridda

Kireystayaasha lagama saari karo guryahooda inta lagu jiro amarka Guryaha-Joogtada ah.

Maxa Furan?

- Makhaayadaha iyo adeegyada baararka ee adeegga bixida iyo geynta
- Dhimista iyo dukaamada tafaariiqda weyn ayaa u furan oo kaliya cuntada, daawada, agabka daryeelka caafimaadka, agabka nadaafadda, sahayda xayawaanka, iyo agabyada daryeelka shaqsiyeed.
- Dukaamada waawayn, xarumaha beeraha, farmashiyayaasha dhakhaatiirta ilkaha, dukaamada daryeelka indhaha, dukaamada qalabka wax lagu iibiyo iyo qalabka badbaadada, dukaamada iibiya, ama kiro, ama kireysta, ama dayactira aaladaha caafimaadka, taleefannada gacanta, gawaarida, iyo qalabka waxay furan yihiin 7da subaxnimo ilaa 8da fiidnimo ballan sameysin kaliya. Awoodda ugu badan ee gudaha waa 25%. Gaarsiinta waa la oggol yahay laga bilaabo 6-da subaxnimo ilaa 9-ka fiidnimo.
- Ganacsiyada aan muhiimka ahayn waxay u furan yihiin oo keliya soo-qaadista waddooyinka laga bilaabo 7-da subaxnimo ilaa 8-da fiidnimo ballan sameysin kaliya. Gaarsiinta waa la oggol yahay laga bilaabo 6-da subaxnimo ilaa 9-ka fiidnimo.
- Suuqyada waaweyn (mall oo kale) waxey u furan yihiin oo keliya qaadista/dirista iyo ganacsiyada muhiimka ah (tusaale, farmasiyada, dhakhaatiirta ilkaha)
- Adeedyada banaanka sida golf-ka, beeraha, garoomada kubbadda koleyga



Maxa Xidhan?

- Meelaha Jimicsiyada iyio adeegyada daryeelka shaqsiyeed sida istuudiyaha cidiyaha iyo meelaha leysku qurxiyo
- Kasiinooyinka, hoolalka bingo, goobaha lagu ciyaaro iyo shineemooyinka
- Adeegyada cunnada ee makhaayadaha ama meelaha kale ee cuntada lagu iibiyo

Maxaad qaban kartaa?

- Ka shaqee guriga haddii ay suurogal tahay.
- Kaliya u bax dibedda marka aad u baahantahy wax muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin shaqada, iskuulka, raashinka, farmashiyaha, daryeelka caafimaadka, caawinta dadka nugul
- Qaado socod, baaskiil wadid ama jimicsi samee iyo dhaq-dhaqaaqa jirka
- Xiro maaskaro iyo ka fogow qofkasto ilaa iyo 2 mitir meel isu jirta .
- Joog aaggaaga oo ka fogow dhammaan safarada aan muhiimka ahayn- xitaa gudaha gobolka

